



Déontologie, neutralité, secret professionnel

Talaabooyinka 8 bishan jannayo

Hordhac

Xukuumaddu waxa aay dajisay talaabooyin lagu joojinaayo koronafaayriska. Waa in la qadariyaa talaabooyinka. Sidaas

Umbaad naftaada iyo dadka kaleba kaga ilaalin kartaa xanuunka. Booliiska ayaa u xil saaran ilaalinta ku dhaqanka talaabooyinkaas.

Talaabooyinka asaasiga a'

- . Haddii aad jirantahay gurigaaga joog.
- . Ku dhaq gacmaha biyo iyo saamuun inta ugu badan.
- . Adiga iyo dadka kale ugu yaraan 1,5 m ha idiin dhaxaayso.
- . Suurto gal weeyi in aad todobaadkii ugu badnaan 10 qof xidhiidh la yeelato. Sida ugu fiican Ha noqoto dibadda.
- . Haddii aad joogtid meel shaaric a' (ligaarka, suuqa, dukaan,..) kana durug sanaan karin dadka 1,5m
 - Waa in aad sidataa maaskiga.
- . Had iyo jeer sido maaskiga.

U safarka magaalo kale ama dibadda a'

- . Waa suurto gal in aad u baxdo tuulo kale ama magaalo kale oo beljimka a' maalin ama dhaawr cisho.
- . Ma isticmaashaa gaadiidka dadweeynaha (bas, taraam ama tareen) ? Ma ka weeyntahay 12 jir ? Qaado
 - Maaskiga ama wax ku hagoog afka iyo sanko.

Waad taggi kartaa holaand, jarmalka ama Luxembourg :

- . Siyaaro ahliga a' .
- . ama adeeg.

Laga bilaabo 15 janaayo

- . Laga bilaabo 15 janaayo, fasax dibadda waad ku tegi kartaa.
 - . Waa suurto gal in aad safar ku tagto dal ka mid a' midowga yurubta, Ingiriisku ku jiro iyo Suisse,



Déontologie, neutralité, secret professionnel

Liechtenstein, aaysland ama noorweey.

. Si fiican u akhriso talaabooyinka aay dejiyeen dalalkaasi. Waxaad ka heli kartaan xaashadda neetka

https://diplomatie.belgium.be/nl/Diensten/Op_reis_in_het_buitenland/reisadviezen

Shaqada

- . Ku shaqee guriga intii suurto gal kuu a'.
- . Qasab ma kugu tahay in aad aado goobta shaqada ? cidda aad u shaqaaysaa waa in aay ilaaliso in shaqaaluhu Kala durugsanaado ugu yaraan 1,5m. Haddii aan lagu dhaqmi karin sidaas ? weeydiiso maaski.
- . Ma haysaa su'aalo kale ? Waxa kaaga jawaabi cidda aad u shaqayso.

Ganacsiga

- . Dhamaan dukaamadu waay furanyihiin.
- . Dukaaka habeenkii ila 1h subaxnimo waay furan yihiin.
- . Waa la rukhseeey suuqyadii dibadda.
- . Waad aadi karta timo jaraha ama goobaha qurxinta.
 - . Balan qabso.
 - . Maaskiga sido.

Horeca

- . Kafeterooyinka iyo makhaayaduhu waxa aay furnaanayaan ila 1h subaxnimo.
 - . Wa in aad sii balansataan ;
 - . Ugu badnaan 10 qof aad ku tagtaan.
 - . Ku eekaada miiskiina.

Xirrirka bulshada

- . Waa suurto gal in aad todobaabkii la yeelatid xiriir 10 qof oo kala duwan.
 - . Waase in aad ku kulantaan dibadda.
 - . Haddii dibadda aad ku kulmi kari weeydaan ? Hawada u fura qolka : daaqad fura.
- . Haddii aad jeclaaysataan in aad koox ahaan aad wax u qabsataan (Tusaalo makhaayad tegis, meel loo baxo Ama guriga oo lagugu soo siyaarto) ? Shirarkaasi toban qof kama badnaan karaan.



Déontologie, neutralité, secret professionnel

Jimicsi

- . Hawlaha isboortiga ee lala galo dad kale waa la ogol yahay.
 - . Isboorti waad la gali kartaa koox ugu badnaan 20 qof a' ;
 - . Inta ciyaartu socoto waa in aad kala durugsanataan ugu yaraan 1,5m .
 - . Dad kale oo buuq a' oo daawan karaa ma jirto.

Laga bilaabo juulaay 1da

- . Laga bilaa juulaayo 1 deeda, isboorti waad la gali kartaa dad ila 50 qof a'.
- . Ciddii daawanaaysa waa u fasax .
 - . Daawada yaashu kama badan karaan 200 oo qof oo fadhida
 - . Isku jira ugu badnaan 1,5 m.

Dhaqanka

Maktabadaha waay furan yihiin.

Laga bilaabo 1 da juulaay

- . Waad tegi kartaa riwaayada, sinemaha ama xafladaha musiqa.
 - . Waxa la ogol yahay ugu badnaan 200 oo qof oo fadhida.
 - . La ilaaliyo kala durugsanaanta 1,5 m.
 - . Tigidhada aad ku sii iibsato telefonka ama laaynka.
- . Xadiiqadaha raxaaysiga ama ciyaaraha ee hagoogan waad soo daawan kartaa.
- . Tababarka iyo kaamamka ciyaalka waa la ogol yahay .

Laga bilaabo 1 da bisha sideedaad

- . Xafladaha arbiciin baxa iyo kuwa kaleba waa la ogol yahay.

Maxaanse la ogo laayn ?

- . Meelaha qoob ka ciyaarka habeenkii weli ma furna.
- . Xafladaha balaadhan iyo kuwa la midka a' lama ogola .

Diinta



Déontologie, neutralité, secret professionnel

- . Acmaashii diinigi waa la ogol yahay waxana ka qaayb geli kara ugu badnaan 100 qof. Tiradaas oo gaadhi 200 oo qof juulaay 1 deeda.
- . Is taabsasho waa mamnuuc .

Kareeshyada iyo dugsiyada wax barasho

- . Kareeshyadu waay furan yihiin .
- . Ardaayda dugsiya hoose iyo dhexe, iyo dugsiya xanaanada waay ku noqonayaan dugsiyada.
- . Maamulka dugsiya ayaa warbixin idinka siin qaabka noqoshada .

Dhiiri-gelin

Talaabooyinkaas waxa aay muhiim u yihin caafimaadka dadweeynaha . Dhamaan dadka waxa laga codsanaya in aay ku dhaqmaan.

Waanad ku mahad santihiin ka qaayb qaadashada . Midnimo ayaan kula dagaal tami karna korona faayriska .